



ISU DIYAARI DABAYSHA DUUFAANADA



TAKE WINTER BY STORM

Fiiri saadaasha cimilada duufaanada dabaylaha soo socda. Tilmaamahani waxay kaa caawin karaan inaad is-diyaariso ka hor inta aysan soo dhicin dabaylaha.

Is-Diyaarinta Qofka

Isticmaal liiska Take Winter By Storm Checklist si aad u diyaariso agabka gurmada, oo ay ku jiran raadiye, toosh, beetariyo dheeraad ah, agabka gargaarka degdegga, macluumaadka xidhiidhka gurmada, biyo, iyo cuntada aan halaabin. Waxaad ka heli kartaa liis faahfaahsan bogga internetka TakeWinterByStorm.org.

Waxaad tooshash, beetariyo dheeraad ah iyo macluumaadka la xidhiidhka danabka dhigataa meel si fudud looga heli karo guriga iyo shaqada hadday dhacdo in quwadda baxdo.

Tagista Quwadda

Horay isugu diyaari tagista quwadda ka hor inta aan la gaarin xilliga duufaanta.

- Haddaad geedo ku abuureyso meel u dhaw khadadka quwadda, hubso inaad geedka ku habboon ku abuurtid goobta ku habboon si aysan u faragelininkhadadka quwadda.
- Wac danabka korontada haddaad aragto geedo saaran ama u dhaw gurigaaga oo soo farageliya khadadka quwadda.

Waxaad soo saara koranta. Tijaabi shaqada soo saaraha korantada ka hor inta quwadda aanay tagin dibna u eeg waxa soo saaraha ku taliyo xagga xidhiidhada iyo shidaalaynta. Waxaad soo-daareyaasha korantada dhigtaa dibadda kana durki albaabada, daaqadaha iyo daloolada kuwaasoo u oggolaan kara kaarboon mono oksaydh (carbon monoxide) inuu soo galo gudaha.

- Soo sheeg marka quwadda baxdo ama marka fiilooyinka quwadda soo dhacaan isla marka ay dhacaan adiga oo waca danabkaaga.
- Markasta ka dheeraw fiilooyinka quwadda ee soo dhacay; ama wax kasta oo u dhaw khadadka quwadda.
- Haddaad is-aragto adiga oo u dhaw khadka quwadda soo soo dhacay, ka fogee cagahaada fiilada quwadda si aad uga dheeraato in aysan ku qabanin korantada dhulka.
- Baabuur ha dul kaxayn fiilooyinka quwadda ee soo dhacay. Haddii fiilada quwadda ku soo dhacdo baabuurkaaga adoo wada, baabuurka ku jir ilaa caawimaad ku soo gaadho.
- Hadday khasab kugu noqoto inaad ka baxdo baabuurkaaga sababtoo ah dab ama khatar kale, ka bood gaadiidka si aanad isla mar u taaban gaadiidka iyo dhulka. Lugaha ku joogso iyagoo wada socda kana durki cagahaaga fiilada ilaa aad ka tagto meel ammaan ah.
- Haddii korontadu kaa tagto, isticmaal tooshash. Ka dheeraw shumacyada, faynuusyada saliidda ama wax kasta oo holac ka soo baxa.
- Waligaa ha isticmaalin dhuxul ama kariyeyaasha gaaska gudaha guriga si aad u kululeyso guriga ama cunto ugu karsato. Waxay keeni karaan sumawga kaarboon mono oksaydh (carbon monoxide).
- Isticmaal nalalka ulusha ama tooshash yaryar meelaha socodka u badan yahaygurigaaga. Gur waxyaabaha yaala dhulka guriga si aadan ugu turaanturoonin.
- Raac tilmaamaha soo saareyaasha marka aad isticmaalayso

- Waligaa ha ku isticmaalin soo-saaraha korantada gudaha guriga, geeraashyada, hululka hoose ee guriga, daashashka ama meelaha la midka ah. Heerarka dhimashada keena ee kaarboon mono oksaydh (carbon monoxide) ayaa si dhakhso ah uga buuxsami kara meelahan waxaanu ku nagaan karaa saacado, xiitaa kadib marka matoorka korantada la damiyo.
- Geli digniin-bixiyaha karboon mono oksaydh (carbon monoxide) oo beetari ku shaqaynaya ama gali digniin-bixiyaha karboon mono oksaydh (carbon monoxide) iyo beetari kayd ah, adoo raacaya tilmaamaha soo-saaraha. In badan, tijaabi beetariyada.
- Ilaali qalabkaada xidhiidhku inay si buuxda dab u leeyihiin (tilifoonada, tilifoonada smart, laabtobyada, iyo taabletyada) haddii ay dhacdo in korontadu tagto ama ka hor intaanad bixin aadna isticmaalin qalabka waqti dheer. Si aad u hubiso kayd, soo qaado buuxiyeyaasha iyo buuxiyaha baabuurka ee qalabkaada xidhiidhka.
- Isticmaal fariinta la qoro haddii bixidda quwadda iyo carqalad soo gasho shabakada taasoo sababtain tilifoonada la diri kari waayo. Ma shaqeyn doonaan tilifoonada aan ku shaqeynin fiilada haddii korontadu tagto. Tilifoonada ku shaqeyyo fiilada dhulka (land line) waa kuwa inta ugu badan leysku haleyn karo.
- Ahaw xogogaal. Isticmaal beetariyada ama raadiyaha gacanta lagu wareejiyo si aad u daarto janalada (channels) warbaahinta deegaanka si aad uga heshaan warar muhiim ah iyo tilmaamo. Booq bogga internetka TakeWinterByStorm.org si aad u hesho meelo aad kala xidhiidho sida la isaga diiwaangaliyo siistemyada digniinta ee deegaankaada.

Marka dabaylaha duufaanadu soo dhacaan, marka hore hubi ammaankaada. Kadibna hubi tan qoyska, asxaabta, iyo jaarka si aad u hubiso inay FIICAN yihiin.

